



Cully Park

Warbixinta Tala Bixinta Caafimaadka

Mar ahaan jirtey qashin-qub, hadana ah beer nasasho

Guud ahaan dalka, bulshadu waxay raadinaysaa inay abuuraan meelo dheeraad ah oo cagaar ah, beeraha nasashada iyo meelo la iskugu yimaado. Tani waa arin dhab ah gaar ahaan magaalooyinka helida dhulku ay yar tahay. Meel mar hore u ahaan jirtey qashin-qub, kaalin shidaal ama dhisme cidla ah, ayay dadku iskugu yimaadaan si ay uga furaan tukaan bunka lagu cabo, qorsheeyaan samaynta beer nasasho ama dhisaan beer dadweyne. Dib u horumarinta noocan oo kale ahi waxay sare u qaadi kartaa caafimaadka iyo wanaaga bulshada iyadoo abuuraysa fursaddaha dhaqdhaqaaqyada caafimaad sida beeridda cunto daray ah, helida dhaqdhaqaaqo jireed oo dheeraad ah iyo ku xirnaanta dadka kale. Tani waa sababta Waqooyiga Bari ee Portland halka ay xaafadu isku yimaadeen si ay goob ahaan jirtey qashin-qub uga dhigaan beer nasasho.

Barnaamijka Qiimeynta Caafimaadka Deegaanka (EHAP), oo qayb ka ah Maamulka Caafimaadka Oregon 'Oregon Health Authority', oo wada shaqayn ka dhaxayso bulshada Oregon inay qiimayn ku sameeyaan kana hortagaan soo gaarista wasakhda kimikada ka samaysan. EHAP waxaa laga codsaday inay goobta Cull Park ka sameeyaan tala bixin caafimaad sababtoo ah waxa jiray walwal ku saabsan suurta galnimada wasakh ka timiday goobtii markii ay ahayd qashin-qubka. Dadku waxay ka dhawaaajiyeen walwal ku saabsan carrada sare ee ku goobta ku dahaaran, sababtoo ah may kala cadayn halka ay ka timiday carradu. Kuwo kale waxay qabeen walwal ku saabsan hawada wasakheysan ee laga yaabo inay wali ka imanayso goobtii qashin-qubka ahaan jirtay.

EHAP waxay la shaqaysay Waaxda Tayada Deegaanka Oregon (DEQ) iyo dadka degan xaafada Cully inay dejiyaan qorshayaasha tijaabada deegaanka ee hantida beerta nasashada. Muunado ayaa ka dib laga baaray hawo iyo carro wasakhaysan.

Natiijada baaritaanka la sameeyay waxay muujisay in dhamaan wasakhda la tijaabiyay ay ahayd heerka qiyaasaha carrada iyo hawada caadiga ah ee deegaannada dadku ku nool yihiin laga helo, taasi oo loo arkay inuu aad u hooseeyo si uu walwal ku keeno caafimaadka bani'aadamka.

Si aad u akhrido warbixinta Talo bixinta Caafimaad ama aad wax badan uga ogaato hantida laga guurey 'brownfields' iyo tijaabada loo sameeyay Cully Park, fadlan booqo: www.healthoregon.org/ehap.



1805

Tuulo Hindidu degto



1936

Dadkii u hor yimid



1948

Beero yar yar



1981

Dhagaxda laga qodo



1990

Qashin-qub



2012

Meel banaan



Beer nasasho

Taariikhda goobta

Cully Park waxay ku taalaa dhul ay mudo badan soo taageeray hab-nololeedka Hindida Oregon. Tuulada Hindida ee Neerchokikoo waxay aad ugu kobacday goobaha u dhow deegaanka Columbia Slough iyadoo ganacsi wax is dhaafsi oo xoogan uu kor u kacay hareeraha Wabiga Columbia. Ka hor horaantii qarnigii 1800, kumanaan ka tirsan qabaa'ilada Hindida Maraykanka oo ka kala yimid Maraykanka dacadadiisa ayay goobtaasi soo jiidatay. Bartamaha qarnigii 1800, dadka ka soo jeeday Yurub way soo guurayeen waxayna samaynayeen beero yar yar, iyadoo ay qayb ka ahayd Xeerkaa Dhulka ee 1850-kii.

Sanadkii 1936-kii, qaybka mid ah hantida Cully Park waxay noqotay meel dhagaxda laga qodo halkaasi oo carrada iyo jayga laga soo saari jiray. Markii godkii dhagaxda laga qodayay la xiray 1978-kii, godkii weynaa ee laga tagey waxaa loo isticmaalay qashin-qub, taasi oo ahayd ficil iska caadi oo dadku sameeyaan wakhtigaasi. Godka hoostiisa waxaa lagu xardhay shay adag oo sida balaastiga oo kale ah, taasi oo ka dhigaysa qashin-qubkii ugu horeeyay ee balaastik lagu xardho Oregon dhexdeeda.

Laga soo bilaabo 1980-1990-kii, hantida dhuleed waxaa loo isticmaalay qashin-qub ahaan lagu shubo alaabta dhismaha ka soo harta. Markii la xiray goobtii qashin-qubka, waxaa lagu dahaaray shay adag oo sida balaastiga oo kale ah. Waxaa la keenay carro goobtana waxaa lagu kor beeray caws.



Tijaabinta hawada iyo carrada

Dadka degan xaafada Cully iyo ururrada bulshada, khabiirada ku takhasusay deegaanka iyo hay'adaha dawladda ayaa kulmay mudo gaaraysa toddoba bilood si ay qorsheeyaan tijaabo deegaanka ku saabsana ugu sameeyaan goobta. Bulshada ayaa rabtay inay ogaadaan in wasakhi ku jirtay carrada iyo hawada ee laga yaabo inay khatar u yeelan karto caafimaadka dadka. Natijadii tijaabadu waxay muujisay in heerka qiyaasaha wasakhda la helay ay la mid tahay ta lagala helo deegaannada dadku ku nool yihiin. Dhamaan wasakhda la qiyaasayna way ka hooseysay heerka qiyaasta ee keeni karta walwal caafimaad.

Xaaladaha hada

Maanta, goobtu waxay ka kooban tahay 25 hektaar oo ah dhul caws ka baxo kaasi oo ku yaala meel ka saraysa xaafada. Waxaa jira ceelal la socda xaalada biyaha hoosta ku jira, hab lagu ururinayo leachate (oo ah dareere ka samaysmay waxyaalo qurmay), iyo hab lagu maamulayo gaaska methane. Gaaska methane waxaa laga ururiyay goobta hawshu ka cosoto waxaana si aada loogu gubay dhisme yar oo ku yaala 75th Avenue iyo halka laga galo NE Killingsworth park. Qashin-qubka iyo habka uu u shaqeeyo waa in la ilaaliyo si dhulka hab badbaado ahaana loogu isticmaalo beer nasasho ahaan.

Waxa mustaqbalka loo isticmaalayo

Qorshaha wayn ee beerta nasashada, oo ay weheliyeen fikradaha iyo talooyinka dadka degaanka ku nool, ayaa la dhameystiray 2008-kii. Xafladdii furitaanka ee goobta beerta dadweynuhu waxay dhacday dayrtii 2012-kii. Ururka aan faa'iido doonka ahayn ee Verde ayaa hogaanka u haya dejinta qorshaha dayactirka deegaan lagu noolaan karo, meel ku meel gaar ah oo dhirta lagu kobciyo, goob lagu cayaaro, goob lagu hayo dhirta qabaa'ilka iyo wadiiqooyin isku xiran oo la maro. Horumarinta muuqaalka beerahan nasashadu waxay bilaabmeen dayrtii 2012-ka waxaana lagu dhamaytiri doonaa marka la gaaro 2014-ka. Qorshayaal kale waxaa ka mid ah isticmaalida ganacsiyada iyo shaqaalaha degaanka oo kaliya wixii agab, alaabo iyo dhismo ah ee loogu tala galay beerta nasashada iyo muuqaaladeeda.



Sideen uga qayb qaadan karaa?

Qof kasta waa la soo dhawaynayaa inuu ka dhiibto fikrado, wixii walwal ah iyo dadaalo ah si uu taageero uga gaysto dhisida Cully Park. Fadlan la xiriir Tony DeFalco, maamulaha Living Cully ee Verde: 503-309-7385 ama www.LetUsBuildCullyPark.org.

Kuwani waa dhawr siyaabood oo dadka iyo kooxuhu samayn karaan si ay taageero u geystaan:

- Fulinta gaarida bulshada (usoo bandhigida, albaab kasta garaacida, dhacdooyinka bulshada);
- Dhaqaale ururinta iyo deeqaha;
- Tabaruca xubin ka noqoshada Cully Park Foot Patrol;
- Taageero ka gaysashada beerta dadweynaha iyo muuqaalada kale ee beerta nasashada;
- Fidinta adeegyo khibrad leh (dhismaha, suuq-geynta, naqshada qaabka dhulka, farsamada, waxbarida/tababarka, qorsheynta, sharciga);
- Soo helida dhirta lagu deeqay ama qiimaheeda hoos loo dhigay iyo waxyaalaha kale.

Fahmida faa'iidooyinka caafimaad ee ay leedahay dhisida Cully Park

Baaritaan ayaa muujiyay isbadal wanaagsan oo ka jira bulshada, sida beerta nasashada ama beer dadweyne, ay kordhin karto caafimaadka iyo wanaaga dadka halkaasi ku nool. Helida noocyada kala duwan ee guriyaynta, shaqada, iyo goob banaan waxay muhiim u tahay maaraynta caafimaadka bulshada. Mashruuca Cully Park wuxuu dadka degaanka siin doonaa fursado la xiriira caafimaadka iyo shaqada, bulshaduna waxay ku rajo weyn tahay isticmaalida qaar ka mid ah faa'iidooyinka badan, kuwaasi oo ay ku jiri doonaan:

- Meel badbaado ah oo dhaqdhaqaaqa jirka lagu sameeyo laguna cayaaro;
- Goob wax lagu beero lagana goosto cunto caafimaad leh oo aad u qiimo jaban;
- Meel banaan oo la iskugu yimaado si loogu xirmo dadka kale ee bulshada ka tirsan;
- Fursad dib loogu soo celiyo dhaqanka Hindida Maraykanka iyadoo la adeegsanayo goobo laga beero dhirta qabaa'ilka; iyo
- Kordhinta badbaadada dadka socda ee lugaynaya.



PUBLIC HEALTH DIVISION

Environmental Health Assessment Program

www.healthoregon.org/ehap

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Talo bixintan Caafimaadka, fadlan kala xiriir EHAP ehap.info@state.or.us ama wac 1-877-290-6767.

Qoraalkani waa la bixin karaa isagoo qaab kale ah marka ay codsadaan dadka naafada ah ama dadka leh luqad aan ahayn Af-Ingiriisiga ee leh xirfad luqada Af- Ingiriisiga ah oo cayiman. Si aad u codsato daabacaadan oo qaab kale ah ama luqad kale ku qoran, la xiriir Barnaamijka Qiimeynta Caafimaadka Deegaanka 'Environmental Health Assessment Program' 971-673-1244 ama 971-673-0372 ee TTY.

SM OHA 8616 (1/2013)

Daabacaadani waxaa taageeray Heshiiska Wada shaqayneed 'Cooperative Agreement' 1E11TS000183-01 ee Hay'ada loogu tala galay Waxyaalaha Wasakhda ah iyo Diiwaan-gelinta Cudurka 'Agency for Toxic Substances and Disease Registry' (ATSDR), oo qayb ka ah Xarumaha Xakamaynta Cudurka iyo Ka hortaga 'Centers for Disease Control and Prevention' (CDC). Waxyaalaha ay ka kooban tahay waa masuuliyada gaarka ah ee dadka qoray kamana turjumayso aragtida rasmiga ah ee ATSDR ama CDC.